Hagaha Wada-hadalka ee Casharka 3:
Ahmiyadda Macaamillada Xilli Hore

Wakhtiga casharku soconayo: 20 daqiiqo
Wakhtiga lagu qiyaasay in lagu dhammaystiray casharka hagaha wada-hadalka: 40-60 daqiiqo

Qodobada muhiimka ah:

- Diyaar-u-ahaanshaha dugsigu waxay bilaabantaa marka qofku dhasho. Waayo-aragnimada garasho iyo bulsho ee xillli hore waxay ka ciyaaraan door muhiim ah koboca carruurta ee xilliga hore.
- Caruurtu si gaar ah ayey ugu dhug leeyihiin dadka kale, waxay sida ugu fiican ugu bartaan macaamillada fool-ka-foolka ah.
- Caruurtu aad ayey bulshaawi u yihiin. Isticmaalidda jalleecada indhaha, tilmaamista, hadalka ku waajahan dhallaanka, iyo ficillada ku-talogal waxay u soo jiiri karaan dareenka carruurta bey'addooda oo ay taageeri karaan barashada.

Guudmarka Casharka:
Bogga 1: *Horudhac*
Bogga 2: *Mahadnaqyada*
Bogga 3: *La Kulan Fatima*
Bogga 4: *Marka la Gaadho Maalinta 2000aad*

✪ Barta joogsiga ee lagu taliyey

- Bogga 4 wuxuu ka hadlayaa cunsurrada diyaar-u-ahaanshaha dugsiga. Kuwan waxa kamid ah xirfadaha garasho, sida fahmidda astaamaha, iyo xirfadaha maskaxeed iyo bulsho sida xakamaynta garaaca wadnaha, dhibaato xallinta, iyo ogaanshaha dareen. Maxay muhiim u yihiin xirfadahan maskaxeed iyo bulsho? Sidee ayuu ilme u dhisi karaa xirfadahan?
- Tusaalayaashani waxay kaliya u taagan yihiin qaar kamid ah xirfado badan oo gacan ka gaysta diyaar-u-ahaanshaha dugsiga. Waa maxay xirfadaha kale ee caruurta dugsiga u diyaariya?

Bogga 5: *Ku Barashada Xidhiidho Taageero Leh*
Bogga 6: *Maxaa Kujira Macaamilka?*
Bogga 7: *Maxaa Kujira Macaamilka? (fiidyowyo)*

✪ Barta joogsiga ee lagu taliyey

- Boggii hore, waxaad ku soo aragay fiidyowyo waalidiin la macaamilaya caruurta. Maxaad ka ogaatay macaamilladan? Maxay waalidiintu dhahayeen ama samaynayeen macaamilladan? Sidee carruurtu u dhaqmayeen una jawaabayeen?
- Waa maxay noocyada macaamillada sida caadiga ah aad la yeelato caruurta noloshaada? Haddii aad awoodaysay inaad ka soo eegto kuwan dhinaca qof ajaanib ah, maxaad dhihi lahayd?

Bogga 8: *Caruurtu Waxay Ka Bartaan Dadka Kale*
Bogga 9: *Sheekaysiga Fiidyowga*
Bogga 10: *Caruurtu Waxay Ka Bartaan Hadalka Dhallaanka Ku Waajahan (fiidiyaha)*
Bogga 11: *Caruurtu Waxay Ka Bartaan Hadalka Dhallaanka Ku Waajahan*
Bogga 12: *Caruurtu Waxay Ku Bartaan Raacista Jalleecada Indhaha*
Bogga 13: *Caruurtu Waxay Ku Bartaan Ku Dayasho*

✪ Barta joogsiga ee lagu taliyey

- Bogagga 8 iyo 9 waxay ka hadleen cilmibaadhis kusaabsan ka barashada caruurta ee shaashadda warbaahinta. Ma la yaabtay cilmibaadhistan? Adigoo waxan og, sidee ayaad qorshayn lahayd inaad isticmaasho shaashadda warbaahinta gurigaaga ama fasalka?
- Ka feker qaar kamid ah walxaha maalinkasta ee gurigaaga ama dugsi-horraadka kuwaasi oo loo isticmaali karayey ciyaar macaamil leh. Marka la eego wixii aad ku soo baratay bogaggii hore, sidee ayaad u isticmaali lahayd walxahan si aad u abuurto macaamil macne leh oo aad la samayso ilmaha? Sidee ayaad ugu ladhi kartaa hadalka dhallaanka ku waajahan, jalleecada indhaha, iyo ku dayashada? Waa maxay tilmaamaha kale ee bulsheed ee ay dhici karto inaad ku darto?

Bogga 14: *Caruurtu Waxay Ku Bartaan Macaamillada Gadaal Iyo Hore*
Bogga 15: *Caruurtu Waxay Ku Bartaan Macaamillada Gadaal Iyo Hore (fiidiyaha)*
Bogga 16: *Ku Barashada Taageerid*

✪ Barta joogsiga ee lagu taliyey

- Daryeelayaashu waxay ku taageeri karaan barashada caruurta iyagoo adeegsanaya taageero – iyagoo siinaya caawimo badan ama yar si ay ugu dhiirigaliyaan caruurtu inay ku fiicnaadaan xirfad ama aragti. Casharku wuxuu bixinaya tusaale hooyo iyo ilmo kujira fiidyow oo wax akhrinaya. Ka feker wakhti aad la kulantay ilmo isku dayaya inuu barto aragti ama xirfad cusub. Maxay isku dayayeen inay bartaan? Sidee ayaad u taageeri lahayd barashadooda haddii dhibaato kujireen? Sidee ayaad ula dhaqmi kari lahayd markay ku dhawaadeen ku fiicnaansho?

Bogga 17: *Cabbirista Bey'adaha Barasho*
Bogga 18: *Cabbirista Bey'adaha Barasho (fiidyowyo)*
Bogga 19: *Heerarka Kala Duwan Ee U-Fiirsiga*

✪ Barta joogsiga ee lagu taliyey

- Waa maxay sifooyinka cusub ee macaamilladan aad ka ogaatay markii aad daawatay fiidyowyada mar labaad?
- Aan ku celiyo su'aasha boggii hore: Waa maxay dhinacyada liiskaagu sheegayaa sifooyinka "daaha dabadiisa"? Waa maxay qaarka kale?

Bogga 20: *Wali U-Jeeda Fiidyowga*
Bogga 21: *Ka Soo Bilaw Waayo-Aragnimada Hore Ilaa Diyaar-U-Ahaanshaha Dugsiga*

✪ Qodobada wada-hadalka u dambeeya

- Ilaa iyo hadda waxaynu shiishka saarnay sifooyinka macaamillada taageerada leh; hase yeeshee caruurtu had iyo jeer lama kulmaan xidhiidho jawaabi og oo taageero leh. Maxaa dhaca marka daryeeluhu aanu si soo jeed lehaanu ugu jawaabin baahida sabiga?

Si aad wax badan uga ogaato macaamillada xilli hore, yara fiiri khayraadkan:

Alberta Family Wellness Initiative | Serve & Return

Vroom

Zero To Three | Early Development

Waxaanu si joogto ah uga shaqaynaynaa horumarinta agabkayaga. Ma haysaa soojeedimo kusaabsan mawduucyada si aad ugu darto hagahan? Kooxdaadu ma ka hadashay wax aananu soojeedin? Waxaanu jeclaan lahayn inaad war nagu soo celiso! Fadlan iimayl noogu soo dir fikradahaaga ilabsout@uw.edu.